

Waa Maxay Amniga Deebaajiga?

Markaad u soo guurto guri cusub, mulkiilayaasha badankoodu waxay ku weydiin doonaan **deebaajiga** oo ay dheer tahay **kirada bisha kowaad**. Milkiilayaasha guryaha qaarkood waxay sidoo kale hore u weydiiyaan **kirada bisha ugu dambeysa**. Waxyaabo kale oo aad ka ogaan karto deebaajiga waa:

Deebaajiga badanaa waxaa u la siman yahay **hal bil kiradeeda**, laakiin **ma xadidna** waxa mulkiiluhu awoodo inuu ka qaado.

Mulkiilayaasha guryaha waa inay ku shubaan deebaajiga **bangi gaar ah**. Haddii aysan sidaas yeelin, ma haysan karaan deebaajiga markaad guurto ka dib.

Mulkiiluhu wuxuu haysan karaa **oo kaliya** deebaajiga si uu u ilaaliyo **kirada aan la bixin, adeegyada**, ama **khidmadaha**, misa si **loo hagaajiyo** waxyeelada adiga ama martidaadu u gaysatay guriga.

Mulkiilayaasha guryaha qaarkood **waxay kaa qaadayan lacag kuso guuritaan ah** oo aan la soo celin karin halkii ay ka qaadan lahaayeen deebaaji. Akhri heshiiskaaga oo hubso in deebaajiga aad bixisay dib loo soo celin karo.

Sideen ku habsadaa inaan dib u helaayo deebaajigayga?



1. **Jadwal u samayso** mulkiilaha gurigaaga **4 maalmood** gudahood markaad ka guureyso.
2. Mulkiilahaagu waxa laga yaabaa inuu sameeyo liiska dayactirka ama kharashaadka. **Ha saxiixin** tan ilaa aad isku raacdaan wax kasta oo liiska ku jira.
 - a. Haddii aad **ku khilaafsan tahay** wax ku saabsan liiska, **ku murmi shayada liiska ku jira** kadib magacaaga ku saxiix. Samee oo saxiix liiskaaga oo aad aaminsan tahay inuu sax yahay.
 - b. **Laba koobi ka samee** liiskaaga. Saxiix oo taariikh u yeel labadaba, **mid sii mulkiilahaaga**.
3. Sii mulkiilahaaga **ciwaanka cusub** meesha aad rabto in deebaajiga lagugu soo diro.

Mulkiilahaagu waa inuu ku siiyaa **qoraal kooban oo ku saabsan wixii dayactir iyo kharash ah 30 maalmood gudahooda markaad guurto**. Haddii aadan goobta dhaawacmin oo aad siisay mulkiilahaaga dhammaan lacagtii lagugu lahaa, **mulkiilahaagu waa inuu kuu soo celiyaa deebaajigaaga**.

Haddii mulkiilahaagu kuu soo celin waayo deebaajigaaga, waad dacwayn kartaa. Booqo help4tn.org si aad ula hadasho qareen oo aad u ogaato sida.

Maxaan u baahanahay inaan sameeyo markaan guurayo?

60 maalmood ka hor inta aanad guurin...

- Akhri heshiiskaaga si aad u aragto waxa ku qoran inaad samayso markaad guureyso.
- **iimayl u dir mulkiilahaaga** ogeysii inaad rabto inaad ka guurto. Sii ciwaankaaga cusub, waydii inay kuu soo celiyaan deebaajigaaga. Waydii in ay kormeero ku soo maraan.

Kahor maalintaada ugu dambeysa...

- **Bixi waxa lagugu leeyahay, sida kirada ama adeegyada.**
- **Bilow xirxirashada sida ugu dhakhsaha badan.** Nadiifi meesha oo xaaq. Ha kaga tagin qashinka gudaha iyo hareeraha meesha. Xusuusnow inaad hubiso armaajooyinka, saqafyada, saqafka hoose, iyo garaashyada.

Maalinta aad guureyso...

- **Ka saar dhammaan alaabtaada guriga kirada ah.** Haddii aad wax ka tagto, waxaa lagugu soo dallaci karaa ka saarista
- **Sawiro iyo muuqaalo ka qaad guriga oo madhan..**
- **Furayaashaada celi.**

SECURITY DEPOSITS